Boggan ugu soo horbaxaya waxaa kujira macluumaad hordhac ah oo ku saabsan meherado doonayo Deeqda Gargaarka Ganacsiga Yaryar. Kahor intaadan bilaabin, waxaa lagu talinayaa in shaqsiyaadka ay si fiican u akhriyaan tan si aad u hesho macluumaad oo aad gadaal uga eegto wixii cusboonaysiin ah. Qaybtan hoose waxaad ka heli doontaa:

- **Macluumaadka Deeqda**
- **Su'aalaha Badanaa Nalawaydiiyo**

***Para leer esta información en español, haga click aquí***

## Ku saabsan LISC

LISC waa mid ka mid ah shirkadaha waaweyn ee bulshada ee waddanka ka jira ee taageera mashaariicda iyo barnaamijyada dib loogu soo nooleeyo bulshooyinka liitaa isla markaana u keenta fursad dhaqaale oo weyn deggeneyaasha. Waxaan maalgashanaa guryo la awoodi karo, dugsiyo tayo leh, jidad badbaado leh, ganacsiyo sii kordhaya iyo barnaamijyo isku xira dadka qaba fursad dhaqaale. Iyada oo looga jawaabayo cudurka dilaacay, waxaan gaarsiineynaa agabyo iyo khibrad si aan ugu taageerno bulshooyinka, ganacsatada iyo dadka. **Halkan waxbadan ka baro**.

# Macluumaadka Deeqda Soo-kabashada

---

*Para leer esta información en español, haga click aquí*

# U-qalmitaanka

Codsadayaashu waxay dalban karaan hal ganacsi kaliya waana inay ahaadaan 18 jir si ay u codsadaan. Milkiilayaasha ganacsiga leh meherado badan, fadlan dhamaystir sahankan ku saleysan ganacsigaaga ugu weyn ee aad leedahay. Deeq kastaa waxay ku xadidan tahay hal shaqsi/ganacsi.

Abaalmarinno ayaa loo samayn doonaa ganacsatada aqoonta u leh, iyo u-qalmitaanka wuxuu ku saleysan yahay soo gudbin sax ah oo dhammaystiran. Ahmiyada ayaa la siinayaa gaar ahaan ganacsatada midabka, haweenka- iyo ganacsiyada ruug-caddaaga ah iyo shirkadaha kale ee meheradaha taariikh ahaan u shaqeeya ee aan heli karin raasamaal dabacsan, la awoodi karo.

Dhammaan dadka guuleystay waa inay caddeeyaan inay horumarinayaan danaha ugu wanaagsan ee bulshada oo ay si xun u saameeyeen dhibaatada Covid-19.

Ururada aan faa'ido doonka aheyn uma qalmaan Barnaamijkan maalgelinta gargaarka ah. Ha iloobin inaad hubiso Bogagga Kheyraadka LISC ee Covid-19: **https://www.lisc.org/covid-19/covid-resources/** khayraadka ugu dambeeya ee ay heli karaan ururada samafalka iyo shaqsiyaadka.

# Asturnaanta

Macluumaadka lagu bixiyo habka loo maro codsiga waa mas'uuliyadda codsade kasta. Codsiyada loo gudbiyo xariirka ayaa wali sir u ah dadweynaha iyo codsadayaasha kale ee la shaqeeya. Codsadayaashu ma u qaban doonaan LISC, kuwa ay ku xiran yihiin, xubnaha, shuraakada iyo shaqaalaha ayaa mas'uul ka ah wixii khasaare ah, waxyeelo ah, kharash ah, ama kharash-bixin, nooc kasta oo la xidhiidha adeegsiga ama **ku habboonaanta, sax ahaanta, ama dhammaystirka wixii macluumaad ah ee lagu soo buuxiyo foomka. Eeg Nidaamka Asturnaanta ee LISC wixii tafaasiil dheeraad ah.**

# Khilaafka Xiisaha

Agaasimayaasha hadda jira, saraakiisha, shaqaalaha iyo qandaraaslayaasha LISC iyo shaqsiyaadka qoyska xubnaha ka ah (xaas, waalidiinta, caruurta, ayeeyo, ilmo awoowe loo yahay iyo caruurta abshaxanka loo yahay, iyo caruurta xaaska, ilmo awoowe loo yahay iyo caruurta abshaxanka loo yahay) uma qalmaan inay dalbadaan ama raadsadaan abaalmarin. Marka lagu daro caddeynta ah inuusan jirin wax khilaaf ah oo ka dhexeeya LISC, wareeg kasta, codsadayaashu waxay u baahan doonaan inay si la mid ah u caddeeyaan in isaga/iyadu uusan wax khilaaf ah ka dhaxeeyn tabaruceyaasha ama maal galiyayaasha ku lug leh kooxdaas gaarka ah. Liistada tabarucayaasha/maal galiyayaasha ku xiran wareeg gaar ah ayaa loo shaacin doonaa si cad si looga jawaabo codsaduhu ama guulaystaha.

# Ogaysiinta

Haddii lagu abaalmariyo, fadlan lasoco in macluumaadka ganacsadaha/macluumaadka codsiga codsadaha, magaca, bayaannada, iyo macluumaadka kale ee la bixiyo inta lagu gudajiro nidaamka abaalmarinta loo isticmaali karo ujeedo dalacsiin ah dhammaan noocyada iyo warbaahinta iyo ganacsadaha/codsadaha waxaa laso xiriiri karaa LISC iyo/ama barnaamijku wuxuu kafaala qaadaa ujeeddooyinkaas oo kale. Codsaduhu wuxuu siiyaa LISC iyo barnaamijku wuxuu kafaala qaadaa ruqsad joogto ah si loogu isticmaalo macluumaadka noocaas iyada oo aan la siin magdhow dheeri ah (marka

laga reebo halka sharcigu uu mamnuucay), iyo iyada oo aan wax xuquuq ah u lahayn dib u eegista iyo/ama oggolaanshaha nuxurkan oo kale. Ilaa la ogeysiiyo, codsadayaashu waa inay oggolaadaan inaysan la wadaagin dadweynaha wax xaalad ah ee guulaystaha, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn dhammaan aaladaha warbaahinta bulshada, warbaahinta wararka, ama daabacaadaha maxalliga ah.

## Korjoogtaynta

LISC waxaa laga yaabaa inay la socoto oo ay qabato howlo qiimeyn ah oo ay maalgaliso Deeqda Kasoo-kabashada Ganacsiga Yaryar. Tani waxay ku lug yeelan kartaa dib u eegista xogta tirade ama tayo ahaanta loo baahan yahay si loo fahmo saameynta maalgalinta.

# Su'aalaha Badanaa Nalawaydiiyo

---

***Para leer esta información en español, haga click aquí***

**Ma badali karaa codsigayga kadib markii la gudbiyay?**

Waxaa lagu taliyay ka hor intaad la buuxin iyo lasoo gudbinin foomka khadka tooska ah, jawaabeyaashu si taxaddar leh ayey u eegaan jawaabaha, maxaa yeelay shaqadaada lama kaydin karo haddii aad ka baxdid bogga kahor intaadan gudbin arjiga. Waxaad sidoo kale waayi kartaa shaqadaada haddii internetkaagu ka bixiso, ama ay sabab u tahay arrimaha kale ee daalacashada shabakadda. LISC ma aqbali karto isbeddelada arjiga mar haddii lasoo gudbiyo, marka fadlan si taxaddar leh dib ugu eeg.

## Codsadayaasha deeqda miyaa la siiyaa xaqiijin ah in ay soo gudbiyeen codsigoodi?

Codsade kastaa wuxuu helayaa xaqiijin shaashada ah oo soo socota haddii dhammaan meelaha banaan si sax ah loogu buuxiyo ka dib marka la taabto "done".

### Haddii aan codsaday wareeggii hore, miyay tahay inaan codsado mar labaad mise codsigayga ayaa lasoo rogi doonaa?

Maya, codsiyadu looma wareejiyo wareegyada dambe. Waa inaad soo gudbisaa codsi cusub wareeg kasta oo deeq ah si loogu tixgeliyo maalgalinta wareegaas. Wareeg kasta wuxuu leeyahay dhinacyo u gaar ah iyo shuruudho maal gashtaha gaar u ah.

### Markaan arjiga buuxinayo, waxaan arkaayaa fariinta qaladka ah "*3.1. Waxaad abuureysaa diwaan nuqul ah Waxaa lagugula talinayaa inaad isticmaasho diiwaan hore u jiray bedelkii.*" Maxaan sameeyaa?

Haddii aad horey u codsatay, deeq hore, waxaad arki kartaa fariintan qaladka ah inta aad iskudayeyso inaad dib u gudbiso dalab. Hadday sidaas tahay, fadlan ku soo gudbi dalabka isla Magacii koowaad, Magacii Dambe iyo Cinwaanka Imaylka sidii aad horeba u soo gudbisay Haddii ay weli arrimo ku haystaan, fadlan noogu soo dir imayka smallbusinessgrants@lisc.org.

## Haddii aan helay Deeqda Gargaarka ee LISC wareegii hore, miyaan dib u codsan karaa wareegyada xiga?

Dadkii lasiiyay abaalmarinadii hore ee ka soo baxay kooxaha hore ee Deeqda Gargaarka ee LISC ayaan u qalmin abaalmarino badan mana aha inay dib u dalbadaan, xitaa haddii isagu/iyadua ay leeyihiin meherado badan.

## Goorma ayaa bogga arjiga onlaynka ah ee LISC uu diidi doontaa gudbinta?

Codsiyada waxaa loo aqbalaa "wareegyo". Wareeggu wuxuu furan yahay hal

toddobaad ka dibna waa la xirayaa. Taariikhaha wareeg kasta waxaa lagu dhigaa websaydhka LISC marka had iyo jeer dib u hubi.

**Waa maxay Diiwaangelintu?**
Waad **iska qori kartaa halkan si laguula socodsiiyo furitaanka wareegyada deeqda.**.

**Sidee ayaa layla soo xiriirayaa ama aan ku ogaanayaa haddii aan heli doono deeq?**
LISC waxay marka hore adeegsan doontaa imaylka si ay ula xiriiraan dhamaan codsadayaasha. Hubso inaad si joogto ah u hubiso imaylka, oo ay ku jiraan foldharada spam-ka. Cusboonaysiin imayl ah ayay dhammaan codsadayaasha ka heli doonaan **Barnaamijka Deeqaha Gargaarka Ganacsiga yaryar ee LISC (notifications@lisc.org)**. Guulaystayaashu waxay ka heli doonaan talaabooyinka xigga **Kaaliyaha Deeqaha Gargaarka Ganacsiga yaryar.**

Guulaystayaasha waxaa lagu ogeysiin doonaa emayl waana in si dhakhso leh ay ugasoo jawaabaan. Kasoo jawaabid la'aanta farriinta ogeysiinta deeq-bixiyaha ama dukumiintida la heli waayay waxay keeni kartaa kasaarida u-qalmitaanka deeq-bixiyeha, luminta dantiisa ama danteeda deeqda iyo xulista bedel ka mid ah kuwa u haray finalka.

**Waa maxay macnaheedu inaad noqoto "guulayste" oo ma loo baahan doonaa dukumiinti dheeraad ah?**

Haddii ganacsigaaga loo xusho inuu yahay guuleyste, waxaa lagugu soo ogeysiinayaa imayl. Haddii laguu doorto sida qof ku guulaystay dammaanad kama qaadayso inaad heli doontid deeq. Guuleyste ahaan, dukumiinti dheeraad ah ayaa loo baahan doonaa

si loo baaro loona hubiyo macluumaadka ganacsiga ee ku saleysan dadaalkiisa, cabiraadaha kuwasoo looga baahan yahay agabyada maalgelinta. Tan waxaa ka mid noqon kara raadinta asal ahaan oo LISC ku sameyn doonto kharashkeena iyo soo gudbinta macluumaad dheeri ah si loogu daro macluumaadka xaqiijinta sida SSN, TIN/ITIN, EIN, W-9 iyo macluumaadka bangiga ee ku habboon si aan u helno lacagaha loo maro ACH haddii abaalmarinta la bixiyo. Xaqiijinta asalka kuma lug laha hubinta amaahda ama saameynta xun ee dhibcaha amaahda.

Fadlan la soco in codsiyada deeqda ansax ah la aqbali karo oo keliya marka loomaro xirka laso dhigay http://www.lisc.org iyo in LISC aysan waligood codsan doonin nuqulada dukumintiga shaqsiyeed sida laysanka darawalka, baasaboorada iyo/ama kaararka cagaaran.. Codsiyada Deeqda Gargaarka Ganacsiga Yaryar waxaa loogu talagalay in lagu aruuriyo macluumaadka aasaasiga ah ee ku saabsan meheradahaaga waana talo soo jeedinta LISC in codsadayaashu aysan bixin doonin ujro caawimaada buuxinta foomkan. Adeegyada mihnadleyda ah ee labixiyay ma kordhin doonaan fursadaha codsadaha ee xulashada. Haddii aad ku aragto tusaalayaasha khayaanada onlaynka ama aad wax su'aalo ah qabtid, nagala soo xiriirsmallbusinessgrants@lisc.org.

**Haddii laguu doorto inaad tahay guuleyste, waxaad LISC ka heli doontaa imayl taariikhahan hoos ku taxan:**

- *Wareega 1 – Abriil 29-keeda*
- *Wareega 2– Meey 25-teeda*
- *Wareega 3– Juun 12-teeda*
- *Wareega 4 – Juulay 3-deeda*
- *Wareega 5 –Agoosto 21-deeda*
- *Wareega 6– Sebtember 18-keeda*
- *Wareega 7– Oktoobar 16-keeda*

**Waa maxay cabirka abaalmarinta?**

Deeqaha waxaa lagu sameyn doonaa qadarka u dhexeysa $5,000 to $20,000. LISC waxay u adeegsan doontaa maalgelinta inay siiso deeqaha ganacsatada wajahaya cadaadis dhaqaale oo deg deg ah sababtuna tahay Covid-19.

# Maxaa deeqda loo isticmaali karaa?

- Lacag bixinnada si loogu daro kirada iyo tasiilaadka
- Mushaharka kulanka (si loogu daro codsadaha)
- Bixinta deynta ay kuleeyihiin iibiyayaasha
- Kharashaadka kale ee hawlgalka degdega ah

Deeq qaatuhu wuxuu si buuxda ula jaan qaadi doonaa dhammaan sharciyada ah federaaliga, gobolka, maxalliga (iyo wixii kale ee dowlad ah), amarrada fulinta, xeerarka, iyo qawaaniinta la xiriira adeegsiga deeq-lacageedka.

#### Ma jiraan wax loo baahan yahay in dib loo bixiyo?

Maya, deeqahaasi uma baahna in dib loo bixiyo. Si kastaba ha ahaatee, **dhamaan canshuuraha la xiriira aqbalida iyo/ama isticmaalka lacagta lasiiyay waa masuuliyada kaliya ee deeq qaataha shaqsiyeed**. **Lacagta la siiyay waxaa uga warbixin doona LISC IRS maaddaama LISC u aragto inay lagama maarmaan tahay sida uu qabo sharciga ku habboon.** Waa siyaasad dheeri ah oo LISC ah in dhammaan deeq-qaatayaasha LISC lagula taliyo inay la tashadaan xirfadlayaal canshuur u gaar ah iyo/ama lataliye sharciyeed si loo hubiyo saameynta canshuurta ee abaalmarinta lacagta caddaanka ah. LISC waxay soo saari doontaa Foomka 1099 oo ah deeq kasta oo ah $600 ama ka badan.

### Helitaanka deeqdu ma saameyn doontaa kaalmada kale ee federaalka ama u qalmidda caymiska shaqo la'aanta?

Deeqda waxay saameyn ku yeelan kartaa sheegashadaada caymiska shaqo la'aanta haddii deeqda loo isticmaalo in lagu bixiyo kharashaadka mushahar bixinta mudada aad qaadaneyso macaashka shaqo la'aanta. Caddadka gargaarka shaqo la'aanta ayaa sida caadiga ah lagu go'aamiyaa dakhliga dawaan ku soo gala, iyo waxay u badan tahay, waa inaad ku caddeysaa toddobaad kasta dakhligii ku soo galay asbuucii hore

mushahar ahaan. Fadlan kala tasho xafiiska shaqo la'aanta gobolkaaga wixii macluumaad dheeri ah ee ku saabsan sheegashada caymiska shaqo la'aanta.

Siinta deeqda ay bixiso LISC ma saameyn doonto awoodda ganacsi ee ay ku dalban karto kuna heli karto amaahda SBA PPP ama kaalmooyinka kale ee federaalka ee lagu heli karo Sharciga CARES. Si kastaba ha ahaatee, deeq bixiyayaashu waxaa lagula talinayaa in isla kharashyada ganacsiga aan lagu maalgelin karin deeq LISC iyo maaliyad federaali ah. Kuwa qaata amaahda PPP ama maalgalinta kale ee hoos timaada Sharciga CARES waa in ay diyaar u ahaadaan in ay muujiyaan, markii ay codsadaan SBA ama hay'ad kale oo dowladeed ama qeyb ka ah dalabka cafiska ee amaahda PPP, taas oo aan il dhaqaale kale aan loo isticmaalin si loogu bixiyo kharashyo la mid ah kuwii ay ku bixiyeen amaahdii PPP ama maalgelinta Sharciga CARES.

**Ma qabtaa su'aalo dheeri ah?**

Waxaan la soconaa weydiimaha loosoo diro **SmallBusinessGrants@lisc.org** waxaana soo dhigi doonaa jawaabaha iyo cusboonaysiinta boggan hore iyadoo la isku dayayo in la taageero hufnaanta iyo helitaanka macluumaadka ay codsadayaasha oo dhan usimanyihiin.